# MAJALADA

# ARIMAHA GUDAHA

BILLE, CADADKA 12 - AAD, JANUARY 2024



**“SOOMAALIYA SOOMAALI BAA LEH,WAA U DHIMANEYNAA, WAANA DIFAACEYNAA "**



WWW.MOIFAR.GOV.SO

MAJALADA

# ARIMAHA GUDAHA

BILLE, CADADKA 12 - AAD, JANUARY 2024





Mudane Axmed Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya: Abiy Axmed Waa Qaswade Geeska Afrika **P.8**

Muqdisho: Kulan Wadatashi Wax kuool ah oo ay yeesheen Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya iyo Odeyaasha Dhaqanka ee Beesha reer Sheekh Isxaaq **P.9**

Qodobbo Muhiim ah oo looga hadlay kulanka Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS iyo Masuulyiinta Ka Socday Xarunta ECES? **P.10**

Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Kulamo La Qaatay UNHCR **P.11**

Qodobbo Hortabinno leh oo looga hadlay kulanka Wasiirka iyo Madax Ka Socotay Dowladda Norway **P.13**

Mudane Fiqi oo Kulan Mirodhal ah la yeeshay Madaxda UNDP Soomaaliya **P.13**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS Oo Kulan Wadatashi Ah Ugu Yeertay Waxgaradka Gobolka Awdal **P.14**

Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo la kulmay Madaxda Wakaaladda Horumarinta Dhismaha Soomaaliyeed **P.15**

Wasiir Fiqi Oo Guddoomiyay Kulan Guddi Howleedka Farsamo Ee Xiriirka Arrimaha Xasilinta **P.16**

Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Ka Qaybgalay Dood Ay Soo Qabanqaabisay Xarunta Wadahadalka Qaran **P.17**

Wasiir Fiqi "Damaca Gurracan Ee Itoobiya wuxuu soo jiray 600 Sano" **P.20**

Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Golaha Shacabka BFS Horgeeyay Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Taakulaynta Barakacayaasha **P.19**

Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaran Ee Ku Aaddan Is af-garadka Maamulka Somaliland Iyo Itoobiya **P.21**

Labada Gole Ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Oo Soo Saaray Xeerka Burinta Is-afgaradka Maamulka Soomaaliya Iyo Itoobiya **P.22**

Akhriso Heshiiska Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Somaliland **P.23**


www.moifar.gov.so



Page 3

Madaxweyne Dr. Xasan Sheekh Maxamuud: Midnimo Ayaan u baahannahay, si aan uga adkaanno argagixisada gudaha iyo cadowga dibadda



Page 4

Madaxweynaha Soomaaliya Iyo Amiirka Dalka Qatar Oo Tababar Usoo Xiray Saraakiil Ka Tirsan Ciidanka Cirka Ee Labada Dal



Page 7

Madaxwaynaha JFS Oo Saxiixay Sharciga Burinta Is-afgaradka Itoobiya Iyo Maamulka Somaliland Oo Ay Ansxiyeen Labada Aqal Ee Baaralamaanka Federaalka Soomaaliya




Page 5

Dowladda Soomaaliya oo Guulo Diblomaasiyadeed Gaartay Kadib Is afgaradkii Aby Ahmed iyo Muuse Biixi



# Madaxweyne Dr. Xasan Sheekh: Midnimo Ayaan u baahannahay, si aan uga adkaano argagixisada gudaha iyo cadowga dibadda

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ayaa magaalada Garoowe ee Xarunta Dowlad Goboleedka Puntland uga qaybgalay caleemo saarka Madaxda la doortay ee Dawlad Goboleedka Puntland.

Madaxweynaha iyo wafdigiisa waxaa si heer sare ah ugu soo dhoweeyey Garoonka Jeneraal Maxamed Abshir Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntland Mudane Siciid Cabdullaahi Deni iyo masuuliyiin kale oo heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed ah.

Intaasi ka dib, Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Dr. Xassan Sheekh Mohamud oo ka hadlay munaasabadda caleemo saarka ayaa jeediyay khudbad taabanaysa arrimaha difaaca dalka iyo la dagaallanka cadowga gudaha iyo dibadda, wadajirka ummadda iyo midnimada,

Madaxwayne Xassan oo ka hadlaya arrimaha midnimada dalka ayaa yiri “Midnimo Ayaan u baahanahay si aan uga adkaano argagixisada gudaha iyo cadowga dibadada. Soomaaliya maanta midnimo ra’yiga ah maalin ay uga baahi badan tahay ma jirto”



# **Madaxweynaha Soomaaliya** Iyo Amiirka Dalka Qatar Oo **Tababar** Usoo Xiray Saraakiil Ka Tirsan **Ciidanka Cirka** Ee Labada Dal

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Dr. Xasan Sheekh Maxamuud iyo Amiirka Dalka Qatar Mudane Tamiim ayaa ka qeyb-galay munaasabad ay ku qalanjabinayeen saraakiil ka tirsan ciidamada cirka ee dalalka Soomaaliya, Qatar iyo Urdun, kuwaas oo tababarka dhanka Taakuleynta Ciidanka Cirka uu kaalinta koowaad u galay Saciid Cali Cabdilaahi oo ka mid ah Halyeeyada Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliya.

Dhanka kale, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa kulan miro-dhal ah la qaatay Amiirka dalka Qatar Amiir Tamiim Binu Xamad oo ay ka wada hadleen xiriirka labada dal iyo xaaladda gobolka.

Amiirka Dalka Qatar ayaa la wadaagay madaxweynaha taageerada iyo garab istaagga ay u hayaan dowladnimada, midnimada iyo madaxbannaanida Soomaaliya, isagoo tilmaamay khatarta ay leedahay in Geeska Afrika iyo Badda Cas laga abuuro degenaansho la'aan saameysa xasilloonida dalalka iyo wada noolaanshaha shucuubta Gobolka.

Dhankiisa, Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo dul istaagay iskaashiga iyo xiriirka taabbo-galka ah ee ka dhaxeeya Soomaaliya iyo Qatar ayaa uga mahadceliyey Amiir Tamiim Binu Xamad iyo Xukumadda dalkaas go'aanka walaalnimada ah ee ay ku garab istaageen midnimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyagoo safka hore kaga jira dalalka walaalaha ah ee mowqifka cad ka qaatay faro-gelinta Itoobiya ay ku sameysay gobanimada Soomaaliya.




# Dowladda Soomaaliya oo Guulo Diblomaasiyadeed Gaartay Kadib Is afgaradkii Itoobiya iyo Gobollada Waqooyi.

Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ayaa hoggaamiyay dedaallo diplomaasiyadeed oo ay Soomaaliya kaga guulaystay Itoobiya ka dib is-afgaradkii gurracnaa ay la gashay Muuse Biixi.

Dowladda Soomaaliya ayaa Goloyaasha Caalamka ka muujisay gardarrada iyo damaca gurracan oo ay Itoobiya ku doonayso Dhulka iyo Badda Soomaaliya, taasoo liddi ku ah qawaaniinta caalamiga ah, sida Qaramada Midoobay, Ururka Wadamada Jaamacadda Carabta, Ururka Iskaashiga Wadamada Islaamka iyo Midowga Afrika.

Sidoo kale, Madaxwayne Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa mid mid u wacay Madaxda wadammada caalamka sida; Madaxwaynaha Dalka Turkiga, Amiirka Dalka Qatar, Madaxwaynaha Dalka Masar.

Si taas la mid ah, Madaxwaynaha JFS ayaa qadka taleefoonka kula hadlay Madaxda Ururada caalamiga ah sida Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Madaxwayne ku xigeenka Midowga Yurub.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo sii wada dedaalladaasi ayaa safar shaqo oo la xiriiray arrimahaan ku tagay dalka Masar, munaasabad si heer sare ah loo soo agaasimay oo ka dhacday Madaxtooyada dalkaas, waxa uu kulan miro dhal ah kula qaatay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Carbeed ee Masar Mudane Cabdulfataax Al-siisi.



Labada Madaxweyne ayaa ka wada hadlay amniga iyo istaraatiijiyadda Carbeed ee Badda Cas, xaaladda gobolka, dagaalka ka dhanka argagixisada iyo xoojinta iskaashiga facaweyn ee ka dhexeeya Labada shacab ee walaalaha ah.

Kulanka gaarka ah ee Labada Madaxweyne kaddib, waxay wadajir u qabteen shir-saxaafadeed ay ku soo bandhigeen miro-dhalka wada-hadalkooda iyo aragtidooda ku aaddan xaaladaha ka taagan Gobolka, iyadoo Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud uu tilmaamay sida dowladda Soomaaliya ay ula kaashanayso xulafada ,

bahwadaagta iyo saaxiibbada caalamka sidii looga hortagi lahaa caqabad kasta oo ka dhan ah madaxbannaanida iyo midnimada dalkeenna.

"Masar dowlad iyo shacab, waxaan nahay xulufo iyo walaalo soo jireen ah oo markasta ka wada shaqeeya sidii ay u abuuri lahaayeen mustaqbal ifaya iyo horumar waara. Wadahadallada miro-dhalka ah ee aan maanta yeelannay waxay muujinayaan sida aan u doonayno in aan xoojinno xiriirka diblumaasiyadeed, amni iyo siyaasadeed."

Madaxweyne Xasan Sheekh oo uga mahad celiyay dowladda Masar mowqifka walaalnimada ah ee ay ka istaageen damaca xukuumadda Addis-ababa ee la xiriira badda Soomaaliya ayaa soo bandhigay ahmiyadda dhaqaale iyo istaraatiijiyadeed ee Badda Cas, waxaa uuna sheegay in Soomaaliya ay saami weyn ku leedahay Baddan, taas oo aysan u aqbalayn dowladda iyo shacabka Soomaaliyeed in dal kale ay kusoo xadgudbaan taako ka mid ah.

Dhankiisa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Carbeed ee Masar Mudane Cabdulfataax Al-siisi ayaa tilmaamay saamaynta amni, dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed ee uu gobolka ku yeelanayo xad-gudubka dowladda Itoobiya ee ka dhanka ah midnimada iyo madax-bannaanida dhuleed ee Soomaaliya, isaga oo sheegay in aysan indhaha ka fiirsanayn xadgudubkaas, maadaama ay Soomaaliya iyo Masar yihiin Labo dal oo qaan-wadaag ah, kuna mideysan dalladaha Carbeed iyo kuwa Afrika.

"Xeerka Jaamacadda Carabta waxa uu dhigayaa in aan wadajir u difaacno dalkii Carbeed oo ay soo food-saarto khatar jiritaan, sidaas awgeed Dowladda Masar ma aqbalayso in la faro-geliyo, laguna soo xadgudbo midnimada iyo amniga Soomaaliya. Awoodda Masar yaan la tijaabin oo la handadin walaalhood, gaar ahaan dalalka walaalaha ah ee naga codsada in aan garab istaagno".

# Madaxwaynaha JFS Oo Saxiixay Sharciga Burinta Is-afgaradka Itoobiya Iyo Maamulka Somaliland Oo Ay Ansxiyeen Labada Aqal Ee Baaralamaanka Federaalka Soomaaliya



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Shiikh Maxamuud ayaa saxiixay sharciga Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee burinta is-afgaradka dowladda Itoobiya iyo Maamulka Somaliland, kaas oo ay ansixiyeen Xildhibaannada Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Madaxweynaha ayaa ku ammaanay wakiilada shacabka Soomaaliyeed ee Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare doorka taariikhiga ah ee ay ka qaateen difaaca dhaxalka jiilasha Soomaaliyeed iyo madaxbannaanida dalka.

Madaxweyne Xasan Shiikh ayaa tilmaamay in sharcigan uu yahay mowqifka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, farriin adagna u yahay cid kasta oo naawilaysa in ay boobto dhulka, badda iyo hawada shacabka Soomaaliyeed.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa shacabka iyo masuuliyiinta Soomaaliyeed ugu baaqay in xoojiyaan midnimadooda marxaladdan taariikhiga ah, ayna kala saaraan arrimaha siyaasadeed ee laga heshiin karo iyo arrimaha masiiriga ah ee taabanaya mustaqbalka ubadkeenna iyo jiritaankeenna.

# Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya: Abiy Ahmed Waa Qaswade Geeska Afrika

Kumannaan Shacabka Soomaaliyeed ayaa Dibadbax ballaaran ka dhigay qeybo badan oo Koonfurta iyo Waqooyiga Muqdisho ah iyaga oo dareenkooda ku muujiyay sida ay uga soo horjeedaan damaca Itoobiya ay ku dooneyso badda Soomaaliyeed.

Dibadbaxayaasha oo cod dheer ku cabirayay dareenkooda ayaa socod ku maray qeybo badan oo caasimadda Muqdisho iyaga oo sitay boorar ay ku qoran yihiin: Baddeenna Beec ma aha, Taako Baddeenna, Kama Tanaasulayno, Taako Dhulkeenna, Kama Gorgortameyno iyo Taako dhulkeenna, Dhiibimeyno!l.

Sidoo kale, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi oo ay wehliyaan qaar ka mid ah xubnaha golaha Wasiirrada XFS ayaa kummanaan shacabka oo reer Muqdisho ah kala qaybgalay dibadbax ballaaran oo looga soo horjeedo damaca gurracan ee Itoobiya ay ku doonayso dhulka iyo badda Soomaaliya, gaar ahaan heshiis kusheegga ay la gashay Madaxwaynaha Maamulka Somaliland.

Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya Mudane Fiqi ayaa sheegay in damaca Itoobiya ay ku doonayso badda iyo barriga Soomaaliya uu soo jiitamayay muddo 600 oo sano ah.






Mar uu ka hadlayay Damaca waxaa uu ka yiri "Saldhig Ciidan ayaan ka rabnaa badda Soomaaliya waxa ay la mid tahay Soomaaliya ayaan rabnaa in aan ka qaadanno Dhulkeeda iyo baddeedada, mana ka yeelayno Itoobiya waxaas'' Mudane Fiqi Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS oo sii wata hadalkiisa ayaa yiri " Abiy Axmed Waa Qaswase Geeska Afrika"

Ugu dambeyntii, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa dhanka kale tibaaxay in Ra'isul Wasaaraha Itoobiya uu ku fashilmay siyaasadda Arrimaha Gudaha Itoobya isla markaana uu doonaayo in uu dhibaato kale abuuro, si uu culayska iskaga yareeyo.

# Muqdisho: Kulan Wadatashi Wax ku ool ah oo ay yeesheen Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya iyo Odeyaasha Dhaqanka ee Beesha reer Sheekh Isxaaq

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi oo uu wehliyo Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS Xildhibaan Saadaad Caliyow ayaa xarunta Wasaaradda kulan wadatashi ah oo looga arrinsanayo damaca gurracan ee Itoobiya ku dooneyso dhulka Soomaaliyeed kula yeeshay Salaadiinta, Cuqaasha iyo odeyaasha dhaqanka ee beesha reer Sheekh Isxaaq ee Gobollada Waqooyi ee Soomaaliya.

Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Xildhibaan Sadaad Caliyow oo madasha ka hadlay ayaa faahfaahiyay kaalinta odeyaasha dhaqanka ee xiisadda isaga oo intaa raaciyay in kulankan uu yahay in la iska wareysto dhulka uu Muuse Biixi doonayo inuu xaqdarro kusiiyo Itoobiya.

Dhankooda, Salaadiinta iyo Cuqaasha reer Sheekh Isxaaq ee Gobollada Waqooyi ee Soomaaliya oo hadallo soo jeediyay ayaa muujiyay dareenkoodu ku aaddan sida ay uga soo horjeedaan damaca gurracan ee Itoobiya ay ku damacday dhulka iyo badda Soomaaliyeed, ayna ka go'antahay difaaca dalka.

-Tallaabada Abiy Axmed iyo Muuse Biixina ay tahay mid gardarro ah, iyaga oo umadda Soomaaliyeed ee Koonfurta iyo Waqooyi ugu baaqay in ay kacaan, iskuna diyaariyaan difaaca dhulka iyo badda Soomaaliyeed.

Cuqaasha iyo Salaadiinta beesha reer Sheekh Isxaaq ayaa sidoo kale kulanka ka sheegay in ay lama taabtaan tahay Midnimada Ummadda Soomaaliyeed, iyaga oo carabka ku dhuftay in masiirka umadda uu mid yahay tan iyo 1960-kii, waajibna tahay ilaalinta bedqabka dhul iyo dad ahaaneed ee Soomaaliya.

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa khudbadiisa u mahadceliyay baraarugga odeyaasha dhaqanka reer Sheekh Isxaaq, isaga oo intaa raaciyay in dhaqanka la ciirsado marka xaaladahan oo kale ay jiraan, ayna yihiin lagama maarmaan. Wasiirka ayaa boggaadiyay shacabka ku sugan Somaliland ee difaacay dhulkooda iyo mas'uuliyiinta ka tirsanaa maamulka Muuse Biixi ee xukuumadda uga baxay dhulka Soomaaliyeed ee uu Itoobiya u saxiixay darteed,

Mudane Axmed Macallin Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya ayaa adkeeyay mowqifka taariikhiga ah Dowladda Federaalka ah ee ilaalinta guud ahaan dhulka Soomaaliyeed, isaga oo u xaqiijyay odeyaasha reer Sheekh Isxaaq iyo shacabka ku sugan Somaliland ee jecel dhulkooda, kana horyimid damaca Itoobiya, in ay Dowladda Soomaaliyeed la garabtaagantahay "Hiil iyo Hoo".



# Wax Ka Ogoow Kulanka Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS iyo Masuulyiinta Ka Socday Xarunta ECES



Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa xafiiskiisa kula kulmay mas'uuliyiin ka tirsan xarunta ECES (European Centre for Electoral Support).

Mas'uuliyiintan oo ay ka mid ahaayeen; Fabio Bargiacchi oo ah aasaasaha iyo madaxa xarunta, kuxigeenkiisa Filiberto Ceriani Segrebondi iyo Julia Onnasch ayaa ugu horreyn Wasiirka Arrimaha Gudaha mudane Axmed Fiqi u sharaxay howlaha doorashada la xiriira ee ay xaruntooda ka qabatay dalal badan oo dunida ah, iyaga intaa raaciyay in ay daneynayaan doorashada Soomaaliya ee xisbiyada badan, oo leh heerarka kala duwan.

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallin Fiqi oo kulanka ka hadlay ayaa dulmar guud ku sameeyay qorshaha dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ee la xiriira doorashooyinka goleyaasha deegaanka, doorashada heer dowlad goboleed iyo midda heer federaal iyo howlaha ay wadaan hey'adaha kala duwan ee federaalka ah ee lagu gaari lahaa.

Ugu Dambayn, Kulanka oo sidoo kale ay qeyb ka ahaayeen hey'adda IIDA ayaa lagu falanqeeyay doorashada iyo arrimaha la xiriira.

# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Kulamo Kala Duwan La Qaatay Hay'adda UNHCR

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi oo ay wheliso Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barkacayaasha Qaranka Marwo Safiya Xasan Maxamed ayaa kulan la qaatay Agaasimaha Xafiis Goboleedka UNHCR Mudane Mohamadou Dian Balde iyo Wakiilka UNHCR ee Soomaaliya Mudane Magatte Guisse.

Kulanka ayaa looga hadlay Xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka oo ay dhawaan meel-mariyeen Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, isla markaana la filaayon in uu dhawaan saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

kulanka waxaa looga hadlay xaaladaha ka taagan gobolka iyo caqabadaha ay wajahayaan qaxootiga iyo barakacayaasha Soomaaliya.

Dhanka kale, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi oo ay wehliso Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Iyo Barakacayaasha Marwo Safiyo Xasan Maxamed ayaa xafiiskiisa kulan sagootis iyo is xog wareysi ah, kula yeeshay mudane Magatte Guisse iyo Marwo Sanaa Omer oo ka tirsanaa Xafiiska UNHCR ee Soomaaliya kuwaas oo ay u dhammaatay howlihii shaqo.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa hadal kooban uu jeediyey uga mahadceliyay shaqadii wanaagsanayd ee ay Soomaaliya ka qabteen, gaar ahaan in xalwaara loo helo arrimaha qaxootiga iyo barakaca isaga oo sidoo kale guddoonsiiyay shahaado sharaf.










# BADDEENNU BEEC MA AHAN













## Hortabinno looga hadlay kulanka Wasiirka iyo Madax Ka Socota Dowladda Norway

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa xafiiskiisa kulan ku qaabilay wafdi ka socda Norway oo hoggaaminaayo ku simaha Danjiraha Dowladda Norway ee Soomaaliya Mr. Carsten Carlsen.

Kulanka ayaa looga hadlay dedaallada ku qotama arrimaha Xasilinta, Dib-u-heshiisiinta iyo Dowladaha Hoose iyo guud ahaan arrimaha Dowlad dhiska.

Dowladda Norway ayaa ka mid ah dalalka saaxibka la ah Soomaaliya, ee ka taageera dhanka Dowlad dhiska iyo horuminta.

## Mudane Fiqi oo Kulan Mirodhal ah la yeeshay Madaxda UNDP Soomaaliya

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa Xarunta Wasaaradda kulan kula qaatay wafdi ka socda Hay'adda UNDP oo uu hoggaaminaayay wakiilkooda Soomaaliya UNDP Mr. Lionel Laurens.

Kulanka ayaa looga hadlay habka iskaashiga iyo arrimaha hortabinta u leh Wasaaradda sanadkaan cusub ee 2024.

Hay'adda u qaabilsan Qaramada Midoobay Barnaamijyada Horumarinta ayaa ka mid ah bahwadaagta Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS ee dhanka Dowlad dhiska iyo Dib-u-heshiisiinta.



# Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS Oo Kulan Wadatashi Ah Ugu Yeertay Waxgaradka Gobolka Awdal

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa kulan wadatashi ah la qaatay Salaadiin, Cuqaallo, Nabaddoonno, Ugaasyo iyo odeyaal kale ka tirsan 135 iyo qaar kale oo kasoo jeedo gobolka Awdal.

Kulankan oo sidoo kale ay goobjoog ka ahaayeen Senator Deeqa Xasan Xuseen, guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha ee Aqalka sare iyo Senator Bilaal Idiris Cabdulaahi ayay odeyaasha beelaha Samaroon iyo Ciise kusoo bandhigeen xaaladda gobolka iyo dareenka shacabka ee kadib go'aankii Muuse Biixi uu Itoobiya kusiiyay badda Zeylac.


Qaar ka tirsan odeyaasha oo goobta ka hadlay ayaa sheegay in Muuse Biixi oo aan sharci ku joogin uu ictiraaf ku raadinayo dhiiga umadda, qaddiyadda Awdal in ay u baahantahay difaac, ayna diyaar u yihiin dagaal iyo in ay iska dhiciyaan cadowga, tallaabadanina loogu gol leeyahay in dhulka lagu wareejiyo.

Senator Deeqa Xasan Xuseen, guddoomiya Guddiga Arrimaha Gudaha ee Aqalka sare ayaa sheegtay ahmiyadda ay leeyihiin kulamadan oo kale, iyada oo ammaantay kaalinta odeyaasha dhaqananka ee ku aadan kahortagga damaca Itoobiya ee ku aaddan dhul boobka iyada oo soojeedisay baahida loo qabo xilligan isku xirnaanta.

Senator Bilaal Idiris C/laahi oo isna kulanka ka hadlay ayaa sheegay in aanu war dhinneyn, oo la doonayo ficil iyo kahortagga damaca Itoobiya iyo difaaca dhulkan dhaxalka u ah umadda Soomaaliyeed.

Ugu dambeyntii, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallin Fiqi oo kulanka ka hadlay ayaa sharaxay mowqifka Dowladda Federaalka ee soo jireenka ah ee ilaalinta bedqabka midnimada dhuleed iyo dad ee Soomaaliya, isaga oo intaa raaciyay in kulankan uu qeyb ka yahay dhaqanka Wasaaradda ee ah in odeyaasha dhaqanka ee gobollada dalka lagala tashto, talo laga weydiiyo arrimaha kusoo kordha deegaankooda, si dhinac walba ay qeyb uga noqdaan go'aannada, waxaa uuna bogaadiyay sida shacbaka Awdal ay diyaar ugu yihiin difaaca qarannimada Soomaaliya.

Mudane Axmed Macallin Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa ku dheeraaday damaca Itooboya iyo sida ay weligeed ugu hanqal taagaysay Zaylac ilaa Isticmaarkii, isaga oo hoosta ka xariiqay in shacabka Soomaaliyeed ay weligood difaaci jireen dhulkooda, welina ay diyaar u yihiin.



# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo La kulmay Madaxda

## Wakaaladda Horumarinta Dhismaha Soomaaliyeed

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi ayaa kulan xafiiskiisa kula qaatay Maareeyaha Wakaaladda Hurmarinta Dhismaha Soomaaliyeed iyo injineerro ka tirsan wakaaladda, loogana hadlay Dib dhiska xarunta dhexe ee Wasaaradda ee ku taalla degmada Boondheere.

Shirkan Wasiir Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallim Fiqi iyo Maareeye Cali Joqombe oo ay wehliyeen Injineero ayaa lagu dul istaagay sida Wakaaladda Hurmarinta Dhismaha Soomaaliyeed ay talo farsamo uga bixin lahayd dhismaha xarunta dhexe ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ee Soomaaliya ayaa dhowaan bilaabeysa Dib u dhiska xarunteeda dhexe, taasi oo ay gacan ka geysaneyso NIS Foundation iyo Deeq bixiyaal kale.



# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Guddoomiyay Kulan Guddi Howleedka Farsamo Ee Xiriirka Arrimaha Xasilinta

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa guddoomiyay kulanka ugu horreeyay ee Guddi Howleedka Farsamo Ee Xiriirka Arrimaha Xasilinta.

Mudane Axmed Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha Soomaaliya oo khudbad kooban kajeediyay Kulankan ay u dhammaayeen, -waaxyaha warbaahineed ee Wasaaradaha XFS iyo hey'adaha dowladda ee ka shaqeeya Arrimaha Xasillinta ayaa waxaa uu adkeeyey ahmiyadda ay Dowladda Soomaaliya u leedahay mideynta farriimaha warbaahineed ee Xasillinta iyo in sidoo kale ay xafiisyada warbaahineed ee dowladda yeeshaan ajendeyaal mideysan oo qaran.

Kulanka inta uu socday waxaa ay Dhammaan ka qeybgalayaashu isla garteen ujeedka iyo howlaha Guddiga Farsamo Ee Xiriirka Arrimaha Xasilinta iyo arrimmo kale

# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Ka Qaybgalay Dood Ay Soo Qabanqaabisay Xarunta Wadahadalka Qaran

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa ka qaybgalay madal Cilmiyeed lagu falanqeeyay "Waayaha cusub ee Soomaaliya: Micnaha iyo Muhiimadda ku biiridda urur Goboleedka Bariga Afrika".

Mudane Aadam Shiikh Xassan Hilowle oo ah La taliyaha Siyaasadda loo dhanyahay ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS ayaa soo jeediyay Xog ku saabsan Xarunta wadahadalka Qaran iyo ahmiyadeeda.

Mudane Maxamed Isaaq Fatiir oo ah Agaasimaha Waaxda Afrika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda Soomaaliya ayaa ka qaybkalayaasha u sharxay Hayaanka Waayaha Cusub ee Soomaaliya ee ku biirista Urur Goboleedka Bariga Afrika iyo faaidooyinka uga jira ganacsatada iyo guud ahaan Soomaaliya.

Mudane Adan kulow Maalim oo ah Lataliyaha Arimaha Sharciga, Dowlad deegaanka Mandera ayaa ka qaybgalayaasha u sharaxay Sooyaalka iyo heerarka uu soo maray Urur Goboleedka Bariga Afrika.

Sidoo kale Mudane Adan Kulow ayaa ku dheeraaday shuruucda iyo waxyaabaha ay tahay in ay ku dhaqmaan wadamada Urur Goboleedka Bariga Afrika.

Madasha oo ay soo qabanqaabisay "Xarunta Wadahadalka Qaran" ayaa waxaa kasoo qaybgalay mas'uuliyiin ay ka mid yihiin; Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Haweenka XFS Marwo Aamina Xadan Cali, Guddoomiye ku xigeenka Amniga & Siyaasadda Gobolka Banaadir Maxamed Axmed Diiriye (Yabooh), la taliyaha Madaxwaynaha JFS ee dhanka sharciga Mudane Ibraahim Iidle Sulaymaan iyo qeybaha kala duwan Bulshada Soomaaliyeed.





# Sawirka Bisha

www.moifar.gov.so




# Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS Oo Golaha Shacabka BFS Horgeeyay Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Taakulaynta Barakacayaasha

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa horgeeyey Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya Hindise Sharciyeedka Ilaalinta Iyo Taakulaynta Barakacayaasha.

Mudane Axmed Macallin Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya oo ugu horreyn u mahadceliyay guddoonka iyo Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, isaga oo sidoo kale akhriyay Cutubyada iyo Qodobada uu ka koobanyahay Hinside Sharciyeedka Ilaalinta Iyo Taakulaynta Barakacayaasha.

Hindise Sharcciyeedkan oo lagu magacaabo "Hindise-Sharciyeedka Sharciga Ilaalinta iyo taakulaynta Barakacayaasha ee 2023", Wuxuu ka kooban yahay 12 Cutub iyo 30 qodob oo ku qoran 30 bog, Waxaa uuna mudane Fiqi oo ka hadlayay ahmiyaddiisa ka yiri "in Muwaadiniintaas Barakacayaasha ah:

(A). Laga ilaaliyo in ay la kumaan wax xad gudub ah ee kasoo horjeeda Xuquuqdooda asaasiga ah ee ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurka kmg.

(B). Laga badbaadiyo falalka danbi ay u geeysanayaan kooxaha wax ma garadka ah oo ka tirsan bulshada.

(C). Loo helo barnaamijyo iyo mashaariic lagu taakuleeyo oo noloshooda lagu horumariyo isla markaana loogu helo xal waara, sida in dib loogu nooleeyo deegaannadoodii hore ama dib u dejin loogu sameeyo goobaha ay u barakeceen iyo wixii kaleba.

(D). Iyo in Iskaashi caalami ah laga yeesho guud ahaan sidii barakacayaasha loogu heli lahaa mashaariic iyo barnaamijyo loogu sameeynaayo xal waara sida: dib u dejin, dib u deegaamayn iwm.

(E). Waxaa muhiim ah in laga hortago barakaca iyo sababaha keeni kara oo uu sharcigu si cad u tilmaamayo.

Ugu Dambayn, Wasiir Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya Mudane Axmed Macallin Fiqi waxaa uu Xildhibaannada ka codsaday iyaga oo tixgelinaya duruufaha jira oo ay ka mid yihiin; baahida wayn ee Hay'adda Qaxootiga Iyo Barakacayaasha u qabto Sharci ay ku maamusho Barakacayaasha Dalka Soomaaliya, musiibooyinka, in dad la eg 3.8 Milyan oo qof ay maanta guryahooda ka barakceen, gacansiiinta loola diyaar yahay kuwa soo gurya noqonaya iyo arrmo kale in ay ka gutaan waajibaadka dastuuriga ah oo ay ansixiyaan.

Hindise Sharciyeedkaan ay soo gudbisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaal-ka iyo Dib u heshiisiinta ayaa waxaa ay golaha wasiirrada ee XFS ansixiyeen 27 Oct 2023.

# Wasiir Fiqi "Damaca Itoobiya Wuxuu Soo Jiray Muddo 600 Sano Ah"



Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa kaqeybgalay dibadbax ballaaran oo ka dhacay garoonka cayaaraha ee Eng. Yariisow kaas oo shacabka deggan caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho ay uga horyimaadeen damaca Itoobiya ee ku aaddan dhul badeedka iyo dekadaha dalka.

Dibadbaxa oo ay soo qabanqaabiyeen maamulka gobolka Banaadir ayaa waxaa sidoo kale mas'uuliyiintii ka hadlay ka mid ahaa; mudane Maxamed Cali Xagaa Wasiiru Dowlaha Amniag gudaha, Xildhibaan Gobsan Muxmummed, guddoomiyaha gobolka Banaadir ahna duqa Muqdisho mudane Yuusuf Jimcaale Madaale, guddoomiye kuxigeenka gobolka Banaadir ee amniga iyo siyaasadda Mudane Maxamed Axmed Diiriye Yabooh iyo qaar kale.

Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya Axmed Macallim Fiqi oo ka hadlay munaasabadda ayaa shacabka Soomaaliyeed uga mahadceliyay dareenkooda ku aaddan dal jacaylka iyo ka dhiidhinta damaca Itoobiya, isaga oo sooqaatay sooyaalka iskudaygii guracnaa iyo damacyadii horay uga fashilmay.

Dhanka kale, Mudane Fiqi waxaa uu xusay in Ra'isul Wasaaraha Itoobiya uu u bareeray ku xadgudubka umadda Soomaaliyeed, isaga oo galay heshiis kusheeg oo meel uga dhacay dowladnimada, isla markaana aan laga yeeli doonin. "Abiy nin Jahawareersan buu ahaan jiray, Suudaan kala qeybinteeda ayuu qeyb ka yahay, Djibouti ayuu la dirirsanyahay, haddana Soomaaliya halkii meel oo u fiyoobeed ayuu dagaal ku bilaabay" ayuu intaa raaciyay mudane Fiqi.

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta waxaa uu adkeeyay in Abiy uu doonayo dhibtaada ka haysata gudaha dalkiisa in uu iskaga damiyo abuuridda dhib kale, isagoo u sheegay in dadka Soomaaliyeed dhulkooda aan dheeldheel lagu qabsan karin.

Ugu Dambayn, Dibadbaxa Shacabka Soomaaliyeed oo ay qeyb ka ahaayeen qeybaha kala duwan ee bulshada, ayaa waxaa ay dareenkooda ku muujiyeen sida ay u diidan yihiin tallaabada Itoobiya, iyada oo ballanqaaday difaaca dalka.

# Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaran Ee Ku Aaddan Isf-agaradka Maamulka Somaliland Iyo Itoobiya




Kulan ay barta fogaan aragga ee Zoom ku yeesheen Golaha Wadatashiga Qaran ayay kusoo saareen Go'aanka Golaha ee ku aaddan Heshiiska lagu sheegay Isf-afgaradka Aby Ahmed iyo Muuse Biixii, waxaana kasoo baxay qodobadan;

1. Golaha Wadatashiga Qaran wuxuu si cad uga soo horjeedaa Xadgudubka Itoobiyaee Gobonimada iyo Midnimada Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed.

2. Golaha wuxuu si buuxda u ayidayaa mowqifka iyo qaraarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay arrinkaan ka qaadatay iyo Xeerarka uu soo saaray BFS ee burinta waxa lagu tilmaamay is-afgaradka dhexmaray Maamulka Somaliland iyo Dowladda Itoobiya.

3. Goluhu wuxuu Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ku garabsiinaya gudashada waajibkeeda Dastuuriga ah ee ku aaddan ilaalinta, dhowrista gobonimada, sharafka iyo Midnimada Dhuleed iyo dadeed ee dalkeenna.

4. Goluhu wuxuu ugu baaqayaa shacabka Soomaaliyeed Maalkasta oo ay joogaan(Dal Iyo Dibad) oo ay ugu horreeyaan dadka reer Somaliland in ay u midoobaan dhowrista gobonimada, madaxbannaanida iyo midnimada qarannimada Soomaaliyeed

5. Ugu Dambayn, Goluhu wuxuu ugu baaqay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, Ururuka Midowga Afrika, Ururka Iskaashiga Islaamka, Ururka Jaamacadda Carabta, Ururka IGAD, EAC iyo Saaxibada kale ee caalamka in ay garab istaagaan xaqqa Soomaaliya ee ilaalinta gobonimada iyo midnimadeeda dhuleeed, si waafaqsan shuruudaha caalamiga.

# Labada Gole Ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Oo Soo Saaray Xeerka Burinta Is-afgaradka Maamulka Somaliland Iyo Itoobiya

Kulan aan caadi ahayn oo xildhibaanada labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaliya taariikhdu markii ay ahayd Janaay 2024 ,02 ayay ku soo saareen Xeerka Ku Aaddan Burinta Is-afgaradka Maamulka Somaliland Iyo Itoobiya, qodobada ugu muhiimsan Xeerka oo ay mudanayaasha labada Aqal Soo saareen waxaa ka mid ah;

Qodobka 1aad: Heshiiskii is-afgarad ay dhexmaray Dowladda Ethiopia iyo Somaliland ee Jannaayo 2024 ,1 lagu gaaray magaaladda Adis Ababa, waa waxba kama jiraan aan lahayn saldhig sharciyadeed, maadaama uu ka hor imaanayo Dastuurka Dalka, Shuruucada Caalamiga ah oo ay ka mid yihiin Axdiga Qaramada Midoobay, Axdiga Midowga Afriga iyo Xeerka lagu aasaasay Urur Goboleedka IGAD, iyo Qaraarrada Caalamiga ah ee Golaha Ammaanka oo xeerinaya madaxbannaanida Dalka, iyo Xeerka Maalgeshiga Shisheeye Soomaaliya iyo shuruucda kale ee dalka u degsan.

Qodobka 2aad: Heshiis kasta oo Caalami ah waxaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u geli kara oo keliya Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed ayadoo sharci ahaan loo soo marsiinayo Hay'adda Sharci dejinta JFS uuna Madaxweynaha JFS ku meelmariyo xeer madaxweyne si waafaqsan Qodobka 90(q) ee Dastuurka KMG ah laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad: Heshiis kasta oo lala galo dowlad ama hay'ad kaloo shisheeye oo ka hor imanaya Dastuurka Federaalka waa waxba kama jiraan aan sharciyad lahayn.

Qodobka 4aad: Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxaa la farayaa in ay si degdeg ah u gaarsiiyo xeerkan Ururka Midowga Afrika, Ururka Jaamacadda Carabta, Ururka Iskaashiga Islaamka, Urur Goboleedka IGAD iyo Xafiiska Qaramada Midoobay, maaddaama Shacbiga Soomaaliyeed xaq u leeyihiin bedqabka dalkooda, ilaalinta gobonnimadooda iyo midnimada geyigooda.

Qodobka 5aad: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu dhammaan shacbiga Soomaaliyeed ugu baaqayaa iney u istaagaan gudashada waajibka saaran muwaaddin kastoo Soomaaliyeed ee difaaca dalka iyo ilaalinta midnimada Qaranka si waafaqsan Qodobka 42aad Faqradda 2aad xarafka (a) iyo (i) ee Dastuurka Federaalka.

Qodobka 6aad: Qofkii ama hay'addii Soomaaliyeed ama caalami ee ku xadgudubta xeerkan waxaa lala tiigsanayaa Xeerka Ciiqaabta Guud iyo Shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Qawaaniinta Caalamiga ah ee arrimahan u abbaaran.

Qodobka 7aad: Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya labadiisa Aqal, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalkuna ku meelmariyo Xeer Madaxweyne laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



# Akhriso Qaraarka Dowladda Federaalka Soomaaliya Ee Ku Aadan

# Xadgudubka Itoobiya Ee Gobonnimada Soomaaliya

Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa soo saaray Qaraarka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku aaddan Xadgudubka Dowladda Itoobiya ee Gobonnimada Soomaaliya, qodoboda ugu muhiimsan Qaraarka Xukuumadda waxaa ka mid ah;

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay si adag u diidaysaa, isla markaana si cad uga soo horjeedaa tallaabada Gurracan ee Dowladda Itoobiya ay ku sheegtay in ay si sharci darro ah heshiis is-afagarad iyo iskaashi kula gashay Maamulka Soomaaliland (Gobollada Waqooyi ee Soomaaliya) taariikh 2024/01/01 Addis Ababa, sida uu qabo Dastuurka JFS Xeerarka Dalka, Xeerarka Caalamiga ah- Soomaaliland waa qayb ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay u aragtaa tallaabadani mid gardarro ah oo halis gelinaysa deris wanaagga, nabad ku wada noolaanshaha iyo xasillinooada Gobolka oo markii horeba la daalaa dhacaayay dhibaatooyin kala duwan, waxayna xadgudub iyo faragalin qaawan ku tahay madaxabannaanida, gobonimada iyo midnimada JFS.

3. waxa lagu sheegay Heshiis Is afgarad Iskaashi iyo Wadashaqayn wa waxba kama jiraan, mana aḥan mid ay aqbalayso Dowladda Federaalka Soomaaliya mana laha saldhig sharciyeed.

4. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay Dowladda Itoobiya uga digaysaa isku day kasta oo xadgudub ku ah Gobonimada, Madaxbannaanida iyo midnimada JFS, waxayna DFS xaq u leedahay in ay kaga jawaabto tallaabada gurracan ee Itoobiya waddo kasta oo sharci ah.

5. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay ficilka Itoobiya u aqoonsatay in uu yabay gardarro iyo duullaan qaawan oo ka dhan ah Gobonimada iyo Midnimada dhuleed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

6. Dowladda Soomaaliya oo ku tiirsan awooda shacabka waxay diyaar u tahay waajibnka ka saaranyahay difaaca, ilaalinta, dhowrista gobonimada, sharafka iyo midnimada dhuleed iyo midda bulsho ee dalkeeda.

7. Dowladda Soomaaliya waxay ka dalbanaysaa Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay, Ururka Midowga Afrika, Ururka Iskaashiga Islaamka, Ururka Jaamacadda Carabta, Ururka IGAD iyo Saaxibada kale ee daneeya nabadda iyo xasillinooda Gobolka iyo Caalamka, iyagoo ilaalinaya xeerarka ay ku dhisanyihiin, gudanayana waajibaadkii loo aasaasey in ay garab istaagaan xaqa Soomaaliya ee ilaalinta midnimadeeda dhuleed, kuna cadaadiyaan Itoobiya in ay ku soo noqoto xeyndaabka shuruucda caalamiga.

8. Dowladda Soomaaliya waxay ka dalbanaysaa Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay iyo Ururka Midowga Afrika in ay qabtaan kulamo deg deg ah, si looga arrinsado xadgudubka iyo farogalinta Itoobiya ee ka dhanka ah Madaxbannaanida iyo Midnimada dhuleed ee dalka Soomaaliya.

9. iyadoo arrintaan laga jawaabayo, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay la tashi deg deg ah ugu yeeraysaa Safiirkeeda dalka Itoobiya.



# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Guddoomiyay Kulanka Billaha Ah Ee Wasaaradda



Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa Guddoomiyay shirka Billaha ah ee Wasaaradda iyada oo ay kulanka ku wehliyeen Wasiir kuxigeenka iyo Wasiiru dowlaha Wasaaradda mudane Cabdixakiim Xasan Ashkir iyo Saadaad Maxamednuur Caliyow.

Shirka oo sidoo kale uu goobjoog ka ahaayeen Agaasimaha Guud ee Wasaaradda mudane Caydaruus Macallin Xasan, agaasime waaxeedyada iyo lataliyeyaasha ayaa lagu soo bandhigay heerka danabeynta diiwaangelinta shaqada iyo shaqaalaha, halbeegyada Wasaaradda ee -2024ka iyo howlaha hortabinta u leh, isticmaalka system-ka E-moifar ee wasaaradda, warbixinta federaalka iyo dowlad goboleedyada, asteynta awoodaha iyo arrimo kale.

Wasiir kuxigeenka Wasaaradda mudane Cabdixakiim Ashir oo kulanka ka hadlay ayaa bogaadiyay howlaha socda, heerka ay marayaan iyo waxtarkooda, waxaa kale uu adkeeyay ahmiyadda in Wasaaraddu u guurtay E-government, oo xal laga gaaray Arkeefiyada iyo keydinta xogaha taas oo ku sheegay in tahay Raasumaal u hareysa qaranka Soomaaliyeed, waxaa uuna kula dardaarmay shaqaalaha adkeynta wadashaqeynta.

Wasiir Dowlaha Wasaaradda mudane Saadaad Maxamednuur Caliyow ayaa dhankiisa sheegay in arrimahan ay yihiin isqiimeyn, isaga oo dhiirigeliyay sysytemka iyo sida uu qaranka u anfacayo.

Ugu dambeyntii, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta mudane Axmed Macallin Fiqi oo shirka soo xiray ayaa u mahadceliyay shaqaalaha xogta ay soo bandhigeen, isaga oo faray in shaqada la labojibaarro, waxaa kale oo ku adkeeyay in lagu shaqeeyo buugga shaqo qeexidda, lana daadejiyo shaqada waaxaha, isaga oo kula dardaarmay in sanadkan sahaqada noqoto mid kooxd oo aaney noqon keliinimo.



# Wasiira Arrimaha Gudaha XFS Oo Ka Qaybgalay Kulanka Wadatashiga Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Taakulaynta Baracakayaasha

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa caasimadda Muqdisho uga qeybgalay kulan wadatashi bulsho oo ku saabsan Hindisaha Sharci ee Ilaalinta iyo Taakuleynta Barakacayaasha.

Mudane Axmed Macallin Fiqi, oo ka hadlay kulankan ay soo qabanqaabisay Hey'adda Qaxootiga iyo Barakacyaasha Qaranka ayaa waxaa uu kudheeraaday heerarka Hindise Sharciyeedkan, ujeedooyinka, -faa'idooyinkiisa ee dhanka Ilaalinta iyo Taakuleynta Barakacayaasha iyo kaalinta ay cid weliba ku leedahay.

Dhanka kale, inta uu socday shirka, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa bulshada goobjoogga ahayd, waxaa uga jawaabay su'aalaho la xiriira Hindise Sharciyeedka, isaga oo is dul istaagay sida sharaciga uu wax badan uga tari doonno wax kaqabashada xaaladda Barakaca ee gudaha dalka.



# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Goobjoog Ka Ahaa Cayaarta Kama Dambaysta Ahyd Ee Koobka Dowlad Goboleedyada







Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa goobjoog ka ahaa cayaar aad u xiiso badan oo ka dhacday Muqdisho Stadium taas oo gebogaabo u ahayd koobka kubbadda cagta maamul goboleedyada iyo Gobolka Banaadir.

Cayaartan oo dhexmartay xulalka Kubadda cagta ee Hirshabelle iyo Galmudug ayaa waxaa ay ku dhammaatay rigooreyaal ay Galmudug ku guuletsatay.

Mudane Axmed Macallin Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ayaa hambaalyo u diray xulka Galmudug guusha ay ka gaareen koobkan ku asteysnaa nabadda iyo isdhexgalka bulshada Soomaaliyeed isaga oo bogaadiyay dhammaan xulalkii ka qeybgalay iyo maamullada ay ka socdeen, cayaartoyda kala duwan, Wasaaraddaha cayaaraha ee dowlad goboleedyada, Wasaaradda cayaaraha ee Federaalka ah iyo Xiriirka Soomaaliyeed ee Kubadda cagta.

Sidoo kale, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa farriin hambalyo ah u diray xulka Galmudug oo ku guulaystay koobka kubbadda cagta maamul goboleedyada iyo Gobolka Banaadir ee 2024.

Farriinta mudane Axmed Macallin Fiqi, Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya waxaa qeyb ka ah dhambaallada ku jiray cayaaraha sida nabadda iyo isdhexgalka, waxaa uuna bogaadiyay qeybaha kala duwan ee maamul goboleedyada, Wasaardaaha, xiriirada, cayaartoyda iyo bulshada Soomaaliyeed.



# Wasiirka Arrimaha Gudaha XFS Oo Kulan La Qaatay La-taliyaha Boqorka Sacuudiga

Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa caasimadda Muqdisho kulan gaar ah kula qaatay La-taliyaha Boqorka Sacuudiga, ahna Kormeeraha Guud ee Xarunta Boqor Salmaan ee Gargaarka iyo Hawlaha Samafalka, Dr Cabdalla Bin Cabdulcasiis Al-Rabiica.

Arrimaha laga wada hadlay waxaa ugu waaweynaa; Mashaariicda Xarunta Boqor Salmaan ee howlaha Gargaarka iyo Samagalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gaar ahaan dhanka; Badbaadinta hubantida cuntada, hoyga, caafimaadka, kabashada degdegga ah, badbaadin, Waxbarasho, caafimaad, biyaha iyo bedqabka deegaanka iyo arrimo kale.

Dr. Cabdalla Bin Cabdulcasiis Al-Rabiica ayaa wasiirka Arrimaha Gudaha ee Soomaaliya Maude Axmed Fiqi uga warbixiyay daahfurka mashaariicda laga hirgelinayo Soomaaliya isaga oo sheegay in dowladda Sacuudi Carabiya ay ka go'an tahay taageerada dhinacyada kala duwan leh ee shacabka Soomaaliyeed iyo dowladooda.

Xarunta Boqor Salmaan ee Gargaarka iyo Hawlaha Samafalka waxaa la aasaasay 2015-kii ayaa waxaa ay gargaar gaarsiisaa daafaha dunida.



ARIMAHA GUDAHA

# Taako Badeenna ah, Waxba laguma Bedelan karo!